Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka
الـهيئـــه الـوطنيـــه للإتـصـــالات
National Communications Authority

Nuqul Kooban

HANAANKA QARAN EE U HOGGAANSANAANTA AMNIGA SAAYBARKA

NATIONAL CYBERSECURITY COMPLIANCE FRAMEWORK

JUUN 2026

https://nca.gov.so

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka
الـهيئـة الوطـنيـة للإتـصـالات
National Communications Authority

This document is produced by
National Communication Authority (NCA).

HANAANKA QARAN EE U HOGGAANSANAANTA AMNIGA SAAYBARKA

https://nca.gov.so

Table of Contents

1. Hordhac ---- 8
2. Muhiimadda Hannaanka ---- 8
3. Ujeedada Guud ee Hanaanka ---- 8
4. Gundhiga Sharciyeed ee Hanaanka ---- 9
5. Dib-u-eegista Hanaanka ---- 9
6. Mabaadi'da Hanaanka ---- 9
7. Qaab-dhismeedka Hannaanka U-hoggaansanaanta Amniga Saaybarka ---- 11
8. Hogaanka Amniga Saaybarka (Cybersecurity Governance: GV1–GV6) ---- 11
9. Amniga Macluumaadka (Information Security: IS1 – IS12) ---- 13
10. Amniga Shaqaalaha (Personnel Security: PS1–PS4) ---- 15
11. Amniga Agabka (Physical Security: PH1–PH5) ---- 16
12. Hannaanka Samaanfaraha ee Amniga Saaybarka (Trafic Light Protocol) ---- 17
13. Maareynta Dhacdooyinka Amniga Saaybarka Iyo Doorka Xarunta SOMCIRT ---- 18
14. Qorshaha Hirgelinta Hanaanka ---- 19
    - 14.1. Marxaladda Koowaad (Muddo-Gaaban: 0 – 12 Bilood) ---- 19
    - 14.2. Marxaladda Labaad (Muddo-dhexaad: 12–24 Bilood) ---- 19
    - 14.3. Marxaladda Saddexaad (Muddo-dheeraad: 24 – 36 Bilood iyo ka badan) ---- 19
    - 14.4. Maamulka Hirgelinta Hannaanka ---- 20
    - 14.5. Taageerada Hirgelinta Hannaanka ---- 20
15. Gunaanad ---- 20

1. Hordhac

Soomaaliya waxa ay ka mid tahay wadamada uu saameeyey isbeddelka dhijitaalka ah (Digital Transformation) iyo tiknoolajiyadda ee Geeska Afrika. Horumarkan waxaa saldhig u ah koboca adeegyada dhijitaalka ah sida adeegyada lacag-bixinta mobeelada (Mobile Money), adeegyada maaliyadeed ee casriga ah (FinTech), ganacsiga elektaroonigga ah (E-commerce), iyo adeegyada kale ee dhijitaalka ah ee ay hirgeliyeen hay'adaha dowladda iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay. Kororka ku tiirsanaanta nidaamyada dhijitaalka ah waxa uu sidoo kale sare u qaaday khataraha la xiriira Amniga Saaybarka sida jabsiga xogaha, xatooyo aqoonsi, iyo khataraha kale ee saaybarka, kuwaas oo noqon kara kuwo saameyn weyn ku yeesha amniga qaranka, dhaqaalaha, iyo kalsoonida bulshada. Weeraradan oo inta badan ah kuwo abaabulan oo xuduudaha ka gudba, waxa ay khatar toos ah ku yihiin joogtaynta adeegyada asaasiga ah ee muwaadiniinta.

Si looga jawaabo caqabadahani, Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) ee Soomaaliya waxay diyaarisay Hannaanka QARANKA EE U HOGGAANSANAANTA AMNIGA SAAYBARKA. (National Cybersecurity Complalince Framework). Hanaankan wuxuu dejinayaa tilmaamaha ugu yar ee waajibka ah ee Amniga Saaybarka ee ay tahay in ay hirgeliyaan dhammaan hay'adaha dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee maamula ama isticmaala Kaabayaasha Macluumaadka Muhiimka ah (Critical Information Infrastructure - CII). Ujeeddada hannaankan waa in la xoojiyo awoodda hay'adaha ee ka hortagga, ogaanshaha, ka jawaabidda, iyo ka soo kabashada weerarrada saaybarka.

2. Muhiimadda Hannaanka

Hannaanka Qaranka ee u Hoggaansanaanta Amniga Saaybarka waxa uu door muhiim ah ka qaadan doonaa:-

- **Ilaalinta Kaabayaasha Muhiimka ah:** sida bangiyada, isgaarsiinta iyo adeegyada dowladda oo ah laf-dhabarta kaabayaasha adeegga bulshada. Weerar lagu qaado nidaamyadan waxa uu saameyn ku yeelan karaa amniga qaranka iyo adeegyada shacabka.
- **Dhowrista Sirta, Hufnaanta iyo Helitaanka Xogta Xasaasiga ah:** Hanaanku waxa uu xaqiijinayaa dhowrista xogaha xasaasiga ah ee ay maamulaan hay'adaha dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay, iyaga oo la ilaalinayo Sirta Xogta (Confidentiality), Hufnaanta Xogta (Integrity), iyo Helitaanka Xogta (Availability). Sidoo kale, wuxuu hubinayaa in xogtaas loo ilaaliyo si waafaqsan heerarka amniga iyo shuruucda dhowrista xogta.
- **Xoojinta Kalsoonida Bulshada:** Hanaanku waxa uu xaqiijinayaa in adeegyada dhijitaalka ah noqdaan kuwo ammaan ah la isku halleyn karo, taas oo ganacsatada iyo shacabka ku abuureysa kalsooni dheeraad ah oo ku aaddan isticmaalka adeegyadaas.

3. Ujeedada Guud ee Hanaanka

Ujeedada guud ee Hanaanku waa xoojinta Amniga Qaranka, ilaalinta Kaabayaasha Muhiimka ah (CII), dhowrista xogaha xasaasiga ah, iyo hirgelinta halbeegyada aasaasiga ah ee Amniga Saaybarka ee hay'adaha dowladda iyo kuwa gaarka loo

leeyahay. Sidoo kale, Hanaankani waxa uu dhisayaa nidaam mideysan oo kor u qaadaya maamulka, u hoggaansanaanta, maareynta khataraha, iyo adkeysiga Amniga Saaybarka ee Dalka.

» Xoojinta Amniga Qaranka
» Nidaaminta maamulka iyo hoggaanka Amniga Saaybarka ee heer qaran.
» Ilaalinta Kaabayaasha Muhiimka ah (CI) ee dalka.
» Dhowrista xogaha xasaasiga ah iyadoo la adkeynayo sirta, hufnaanta, iyo helitaanka xogta.
» Hirgelinta shuruudaha aasaasiga ah ee Amniga Saaybarka ee hay'adaha dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay.
» Mideynta iyo iswaafajinta heerarka Amniga Saaybarka ee dalka oo dhan.
» Horumarinta iyo dhisida nidaamyada maareynta khataraha Amniga Saaybarka.
» Xoojinta ogaanshaha, ka hortagga, maareynta iyo jawaab-celinta degdegga ah ee dhacdooyinka amniga saaybarka, iyada oo la adeegsanayo Xarunta SOMCERT.
» Hubinta u hoggaansanaanta sharciyada, xeerarka, iyo habraacyada qaranka.
» Kor u qaadista wacyigelinta iyo tababarka xirfadeed ee shaqaalaha.
» Horumarinta joogtada ah ee Amniga Saaybarka iyadoo la adeegsanayo hannaanka **Plan-Do-Check-Act (PDCA)**.
» Xoojinta iskaashiga gudaha iyo kan caalamiga ah ee dhinaca Amniga Saaybarka.

4. Gundhiga Sharciyeed ee Hanaanka

Hannaankani wuxuu ku dhisan yahay shuruucda dalka ee xoojinaya amniga Qaranka, ilaalinta kaabeyaasha muhiimka ah, iyo dhowrista xogta. Hanaankani wuxuu waafaqsan yahay sharciyada hoos kuxusan

01 **Sharciga Isgaarsiinta Qaranka**

02 **Sharciga Dhowrista Xogta**

03 **Sharciga Amniga Saaybarka, iyo**

04 **Dhamaan sharciyada kale ee dalka.**

5. Dib-u-eegista Hanaanka

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) waxay dib-u-eegis ku sameyn doontaa Hanaankani Saddexdii (3) sano mar, si loo xaqiijiyo inuu la jaanqaadayo isbedelka iyo baahiyaha ganacsi, khataraha cusub ee saaybarka, horumarka tiknoolajiyadda, iyo hababka qaran ee ka hortagga, ogaanshaha, ka jawaabidda, iyo yareynta khataraha amniga saaybarka ee dalka.

6. Mabaadi'da Hanaanka

Hanaankan waxaa hagaya **Toddoba (7)** mabda' oo muhiim ah, kuwaas oo qaabeeya go'aannada, waajibaadka iyo tallaabooyinka looga baahan yahay hay'ad walba. Mabaadi'dani waxa ay caddeynayaan in Amniga Saaybarka uusan ahayn hawl farsamo oo kaliya, balse uu yahay waajib hoggaamineed, mas'uuliyad la wadaago, iyo hannaan ku dhisan maaraynta khataraha Saaybarka.

No	Mabda’a	Mas’uuliyadda
1	Mas’uuliyadda Hoggaanka Sare (Top Leadership Accountability)	Hoggaanka ugu sarreeya hay’addu waxa uu qaadayaa mas’uuliyadda kama dambaysta ah ee Amniga Saaybarka iyo gudbinta warbixinada si waafaqsan Sharciga Amniga Saaybarka.
2	Mas’uuliyadda Wadareed (Collective Responsibility)	Qof walba waa inuu qaataa mas’uuliyad lagu ilaalinayo hantida iyo kaabeyaasha muhiimka ah ee dalka.
3	Mas’uuliyadda Shakhsiga ah (Personal Accountability)	Qof kasta wuxuu mas’uul ka yahay ilaalinta howsha loo igmaday, waana lagula xisaabtamayaa haddii uu jebiyo xeerarka loo dajiyey.
4	Maaraynta Khataraha (Risk Management / Proportionality)	Hay’aduhu waa inay tallaabooyinka amniga waafajiyaan baahiyahooda, heerka khatarta iyo muhiimadda xogtooda.
5	Wadaagid Ammaan ah oo La Hubiyay (Secure / Assured Sharing)	Hay’aduhu waa inay hirgeliyaan tallaabooyin amni oo xaqiijinaya in xogta si sugan la isku dhaafsado, iyadoo aan loo eegin nooca xogta ama Hannaanka gudbinta.
6	Shaqaale Lagu Kalsoonaan Karo (Suitable, Trustworthy and Reliable Staff)	Hay’aduhu waa inay xaqiijiyaan hab-dhaqanka iyo kalsoonida qofka ka hor shaqaaleysiinta, si loogu aamino nidaamyada iyo kaabeyaasha muhiimka ah.
7	Adkeysi (Resilience)	Hay’aduhu waa inay hirgeliyaan awood adkeysi oo waqti ku habboon looga jawaabo, loogana soo kabto weerarada saaybarka, si loo yareeyo hakadka adeegyada iyo khasaaraha dhaqaale ee hay’adda.

7. Qaab-dhismeedka Hannaanka U-hoggaansanaanta Amniga Saaybarka

Hanaankani waxa uu qeexayaa tilmaamaha iyo halbeegyada Amniga ee Aasaasiga ah oo ku saleysan Hannaanka horumarinta joogtada ah ee PDCA (Plan, Do, Check, Act), oo kooban afar (4) qaybood oo kala ah:



Maamulka Amniga
(Security Governance)



Amniga Macluumaadka
(Information Security)



Amniga Shaqaalaha
(Personnel Security)



Amniga Agabka
(Physical Security)

8. Hogaanka Amniga Saaybarka (Cybersecurity Governance: GV1-GV6)

Hoggaanka Amnigu wuxuu dejinayaa shuruudaha aasaasiga ah ee lagu xoojinayo maamulka, macluumaadka, shaqaalaha, agabka iyo goobaha, si waafaqsan yoolalka hay'ad kasta, waajibaadka sharciga ah, iyo heerka khatarta la aqbali karo *(Risk Appetite)*. Qaybtani waxay dejinaysaa shuruudaha aasaasiga ah, oo kooban:

Halbeeg	Shuruuddaha Aasaasiga ah
GV1 **Mas'uuliyadda Hogaanka Sare**	Hoggaanka sare ee hay'adaha maamula Kaabayaasha Muhiimka ah waa inay soo saaraan ayna ansixiyaan Siyaasadda Amniga Saaybarka, taas oo qeexaysa muhiimadda macluumaadka, maareynta khataraha, isla-xisaabtanka hoggaanka sare, mas'uuliyadaha amniga saaybarka, iyo heerka khatarta la aqbali karo (Risk Appetite).
GV2 **Siyaasadda Amniga Saaybarka**	Dhammaan hay'adaha maamula Kaabayaasha Muhiimka ah waa inay aasaasaan qaab-dhismeed maamul amni oo ku habboon, kaas oo qeexaya isla-xisaabtan cad oo heer kasta ah, iyadoo Maamulka Fulinta uu dejinaayo heerka khatarta saaybar ee la aqbali karo *(Risk Appetite)*, si waafaqsan yoolalka iyo waajibaadka hay'ad kasta iyo Hannaanka ISO/IEC 27001:2022
GV3 **Hirgalinta Tababar iyo Wacyigelin**	Hay'aduhu waa inay hirgeliyaan tababar wacyigelin amni saaybar ka hor isticmaalka Kaabayaasha Muhiimka ah si kor loogu qaado wacyiga shaqaalaha iyo jabinta xeerarka, lana qiimeeyo ugu yaraan sannadkiiba mar.
GV4 **Qorshaha Joogtaynta Ganacsiga iyo Soo-kabashada Masiibooyinka**	Hay'aduhu waa inay hirgeliyaan Qorshaha Joogtaynta Ganacsiga (BCP) iyo Qorshaha Soo-kabashada Masiibooyinka (DRP) si loo yareeyo saameynta khataraha, loona xaqiijiyo soo-kabasho degdeg ah.
GV5 **Maareynta Dhacdooyinka**	Hay'adaha maamula Kaabayaasha Muhiimka ah waa inay hirgeliyaan hannaan rasmi ah oo lagu maareeyo dhacdooyinka amniga saaybarka laguna xaqiijiyo ka-jawaabid degdeg ah oo wax-ku-ool ah, si waafaqsan habraacyada SOMCIRT iyo Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka.
GV6 **Hannaanka Hubinta Warbixinada**	Hay'adaha maamula Kaabayaasha Muhiimka ah waa in ay dejiyaan hannaanka hubinta iyo u-hoggaansanaan si loo yareeyo khataraha amniga, iyada oo maamulka sare loo gudbinayo qiimeynta khatarta iyo warbixin u-hoggaansanaan sanad walba.

9. Amniga Macluumaadka (Information Security: IS1 - IS12)

Amniga Macluumaadku waxa uu xaqiijinayaa badqabka, hufnaanta/saxnaanta, iyo helitaanka xogta, nidaamyada, shabakadaha iyo agabka lagu gudbiyo ama lagu keydiyo xogta ha'yadda. Waxa uu hay'adaha ku waajibinayaa in ay hirgeliso siyaasado, habraacyo, iyo hanaan farsamo amni oo lagu ilaalinayo xogta iyo adeegyada dhijitaalka ah.

Halbeeg	Waajibaadka
IS 1: Siyaasadda Amniga Macluumaadka (Information Security Policy)	Hoggaanka sare waa inuu dejiyo, ansixiyo, islamarkaana hirgeliyo Siyaasad Amniga Macluumaadka iyadoo la jaanqaadaysa baahiyaha hay'adda, waajibaadka shaqaalaha, weerara saaybarka, iyo heerka khatarta la aqbali karo.
IS 2: Maaraynta Agabka (Asset Management)	Hay'addu waa inay diiwaangeliso, ilaaliso, islamarkaana maamusho agabka taageera kaabayaasha muhiimka ah, iyadoo agab kasta loo magacaabayo mas'uul awood u leh. Waa in la adeegsadaa nidaamka kala-saaridda agabka, diiwaanka agabkana si joogto ah loo hubiyaa, iyadoo khataraha amniga saaybarka lala wadaagayo Hoggaanka Sare.
IS 3: Wadaagista Xogta Ammaan ah (Secure Information Sharing):	Hay'adaha maamula kaabayaasha muhiimka ah waa inay xaqiijiyaan in dhinacyada xogta lala wadaagayo ay u hoggaansamaan siyaasadaha amniga saaybarka, iyadoo la adeegsanayo heshiisyo rasmi ah iyo in si joogto ah loo qiimeeyo fulinta siyaadaha Amniga Saaybarka.
IS 4: Amniga Silsiladda Saadka (Supply Chain Security)	Hay'addu waa inay yareyso khataraha silsiladda saadka (supply Chain Security) iyadoo hirgelinaysa habraacyo amni. Waa in la xaqiijiyaa in adeeg-bixiyeyaashu maraan hubin iyo qiimayn amni si looga hortago in agabka la soo iibsaday ay horseedaan khatar amni. Sidoo kale, fulinta habraacyada amniga waa in la qiimeeyaa ugu yaraan sanadkiiba mar, iyadoo tallaabo laga qaadayo dhinacyada ku guuldarraysta fulinta habraacyada amni.
IS 5 – Maareynta Xuquuqda Helitaanka (Access anagement):	Hay'addu waa inay xaqiijisaa in kaliya dhinacyada leh baahi shaqo iyo oggolaansho amni ay helaan Kaabayaasha Muhiimka ah. Waa in la hirgeliyaa siyaasad iyo hanaan rasmi ah oo lagu maamulo diiwaangelinta, wax-ka-beddelka iyo joojinta helitaanka, laguna sameeyo dib-u-eegis joogto ah

IS 6 – Xakamaynta Amniga Shabakadaha (Network Security Controls)	Hay'addu waa inay hirgelisaa xakameyn farsamo oo amni, taas oo u dhiganta qiimaha iyo muhiimadda nidaamyada iyo agabka. Waa in la diyaariyaa qaab-dhismeed amni oo lagu kala saarayo shabakadaha iyadoo lagu saleynayo heerka xogta,
IS 7 – Ka-hortagga Koodhka Waxyeellada Leh (Malicious Code Protection):	Hay'aduhu waa inay hirgeliyaan hanaan amni oo lagu ogaado, loogana hortago koodhka waxyeellada leh. Waa in la dejiyo siyaasad amni oo ku habboon, lana wacyigeliyo isticmaalayaasha si loo yareeyo khataraha iyo waxyeellada koodhkaas.
IS 8: Amniga Aaladaha Gacan-qabsiga iyo Kuwa La Saari Karo (Portable and Removable Media Security)	Hay'aduhu waa inay hirgeliyaan hanaan rasmi ah oo lagu xakameeyo isticmaalka aaladaha gacan-qabsiga iyo kuwa la saari karo, si looga hortago helitaan, beddelid iyo tirtirid xog aan la oggolayn. Waa in la dejiyo siyaasad lagu maareeyo isticmaalka aaladahaas, laguna mamnuuco kaydinta xogta xasaasiga ah ee aaladaha gaarka loo leeyahay ama shaqsiga ah.
IS 9 – Amniga Galitaanka Fog (Remote Access Security)	Hay'addu waa inay hirgelisaa tallaabooyin amni oo lagu maareynayo khataraha galitaanka fog. Waa in la adeegsado hanaan lagu xakameeyo galitaanka fog. Sidoo kale, waa in la wacyigeliyo shaqaalaha iyo macaamiisha si looga hortago khataraha, loona joogteeyo adeegyada.
IS 10 – ilaalinta Amniga Xogta (Protective Monitoring)	Hay'addu waa inay hirgelisaa hanaan lagu ogaado, lagula socdo, laguna diiwaangeliyo falalka aan la oggolayn ee nidaamyada xogta. Waa in la adeegsado diiwaanno amni oo sugan, si joogto ahna loo falanqeeyo natiijooyinka kormeerka, iyadoo lala waafajinayo maareynta dhacdooyinka iyo siyaasadaha shaqaalaha.
IS 11 – Kaydinta iyo Dib-u-soo-celinta Xogta (Backup and Recovery):	Hay'addu waa inay dejisaa habraac rasmi ah ee kaydinta xogta muhiimka ah, si loo xaqiijiyo dib-u-soo-celinta adeegyada xilliyada masiibooyinka. Muddada iyo nooca kaydintu waa inay waafaqsanaadaan muhiimadda xogta, sidoo kalena xogta waa in lagu kaydiyaa goob ammaan ah.
IS 12 – Xaqiijinta Amniga Nidaamyada (System Accreditation)	Hay'addu waa inay u magacawdaa mas'uul sare oo awood u leh xaqiijinta amniga nidaamyada. Waa in la diyaariyaa hannaan rasmi ah oo qeexaya heerka xaqiijinta, lana diiwaangeliyaa habraacyada amniga.

10. Amniga Shaqaalaha (Personnel Security: PS1-PS4)

Amniga shaqaaluhu wuxuu yareeyaa khataraha iyo weerarada suurtagalka ah ee hay'adda, iyadoo la xaqiijinayo kartida, hufnaanta, iyo aaminaadda shakhsiga ka hor inta aan la siin oggolaanshaha gelitaanka xogta iyo agabka xasaasiga ah. Sidoo kale, waa in la hirgeliyaa hanaan rasmi ah oo si joogto ah loogu maareeyo looguna kormeero amniga shaqaalaha.

Halbeeg	Shuruuddaha Aasaasiga ah
PS 1 – Doorarka iyo Mas'uuliyadaha Amniga (Security Roles & Responsibilities)	Hay'addu waa inay xaqiijisaa in shaqaalaha iyo macaamiishu fahmaan mas'uuliyada amniga xogta. waa mas'uuliyadda amniga lagu qeexaa habraacyada amniga iyo qandaraasyada shaqada, iyadoo u hoggaansanaan la'aanta waajibaadka horseedi karto anshax-marin, shaqo ka joojin ama dacwad sharci.
PS 2 – Hubinta Amniga Aasaasiga ah (Baseline Security Clearance)	Hay'addu waa inay hirgelisaa hubin amni oo aasaasi ah si loo xaqiijiyo hufnaanta iyo ku-habboonaanta shaqaalaha loo oggolaanayo inay galaan Kaabayaasha Muhiimka ah. Sidoo kale, waa in la hubiyaa aqoonta iyo khibradda shaqo ee shaqaalaha. Waa in la diiwaangeliyaa natiijooyinka hubinta si loo maareeyo khataraha ka dhalan kara.
PS 3 – Hubinta Amniga Qaranka (National Security Vetting)	Hay'addu waa inay hubisaa shaqaalaha loo igmaday inay galaan nidaamyada iyo xogta muhiimka u ah amniga qaranka, kaabeyaasha muhiimka ah, xasilloonida dhaqaalaha dalka iyo amniga bulshada. waa in la diiwaangeliyaa natiijada hubinta, iyadoo la raacayo heerka oggolaanshaha amni ee ku habboon.
PS 4 – Kormeerka Joogtada ah ee Amniga Shaqaalaha (Ongoing Personnel Security Monitoring)	Hay'addu waa inay si joogto ah u qiimeysaa hufnaanta iyo kalsoonida shaqaalaha haysta oggolaanshaha gelitaanka Kaabayaasha Muhiimka ah iyo xogta dowladda. Waa in la hirgeliyaa diiwaan rasmi ah oo la cusboonaysiiyo, lana hubiyo in gelitaanka agabka xasaasiga ah uu ku xiran yahay baahida dhabta ah ee shaqada. Sidoo kale, waa in la sameeyaa dib-u-eegis amni oo joogto ah, lana qaadaa tallaabooyin ku habboon haddii la jebiyo habraacyada amniga.

11. Amniga Agabka (Physical Security: PH1-PH5)

Amniga agabku wuxuu ilaaliyaa dhismaha, qalabka, macluumaadka iyo shaqaalaha, si looga hortago gelitaan aan la oggolayn, xatooyo, wax-ka-bedel iyo faragelin ka dhalan karta dembi, basaasnimo, masiibooyin dabiici ah iyo argagixiso, iyadoo lagu saleynayo hab difaac lakabyo badan leh, lana waafajiyo dhamaan habraacyada amniga ee hay'adda

Halbeeg	Shuruudda Aasaasiga ah
PH 1 – Xadka Amniga Agabka (Physical Security Perimeter)	Hay'addu waa inay dejisaa habraac amni oo ku habboon si loo ilaaliyo xarumaha Kaabayaasha Muhiimka ah, loogana hortago khataraha sida masiibooyin dabiici ah, falal burburin iyo argagixiso. Waa in la qeexaa heerka amniga, la sameeyaa qiimeyn khatar, lana hirgeliyaa xakamaynta gelitaanka si loo diiwaangeliyo, loola socdo, loogana jawaabo dhacdooyinka amniga.
PH 2 – Xakamaynta Gelitaanka Goobaha Agabka Muhiimka ah (Physical Entry Controls)	Hay'addu waa inay hirgelisaa Hannaanka lagu ilaaliyo goobaha agabka muhiimka ah sida kaamirooyinka (CCTV). Waa in la diiwaangeliyaa gelitaanka, dhaqdhaqaaqa shaqaalaha iyo dadka soo booqda, lana maareeyaa bixinta kaararka shaqaalaha, oggolaanshaha gelitaanka iyo dhaqdhaqaaqa agabka muhiimka ah.
PH 3 – Xakamaynta Amniga Gudaha ee Agabka (Internal Physical Security Controls)	Hay'addu waa inay dajiyaa hanaan lagu xakameeyo amni gudaha si loo ilaaliyo Kaabayaasha Muhiimka ah, looga hortago weerarrada, gelitaan aan la oggolayn iyo khatarta deegaanka. Heerka ilaalinta agabka waa in lagu saleeyaa qiimaha iyo muhiimadda agabka.
PH 4 – Ilaalinta Qalabka iyo Kaabayaasha (Equipment and Infrastructure Protection):	Hay'addu waa inay hirgelisaa tallaabooyin adag oo lagu ilaalinayo qalabka iyo kaabayaasha taageera hawlaha muhiimka ah, si looga hortago luminta, wax-ka-beddelka sharci-darrada ah, ama xatooyada. Waa in qalabka muhiimka ah lagu kaydiyo goobo amni leh, lana xaqiijiyo in si joogto ah loo ilaaliyo adeegyada korontada, isgaarsiinta, iyo xog-isweydaarsiga, si loo dammaanad-qaado badqabka iyo shaqeynta joogtada ah ee agabka.
PH 5 – Baabi'inta iyo Dib-u-isticmaalka Kaydinta Xogta (Secure Disposal and Re-use of Storage Media)	Hay'addu waa inay dejisaa habraac oo lagu maareeyo baabi'inta iyo dib-u-isticmaalka kaydinta xogta, loogana hortago faafinta ama dib-u-soo celinta xog la tirtiray. Waa in heerka baabi'inta lagu saleeyaa muhiimada xogta, lana diiwaangeliyaa dhammaan baabi'inta xogta iyo Dib-u-isticmaalka Kaydinta Xogta.

12. Hannaanka Samaanfaraha ee Amniga Saaybarka (Trafic Light Protocol)

Hannaanka Samaanfaraha ee Amniga Saaybarka waa hanaan caalami ah oo lagu kala sooco heerka faafinta iyo wadaagista xogta amniga saaybarka, si xogta la xiriirta dhacdooyinka amni, digniinaha iyo warbixinnada farsamo loogu wadaago si hufan, nidaamsan, xaddidan oo la fahmi karo, iyadoo la tixgelinayo qiimaha xogta iyo ujeeddada loo adeegsanayo.

Hanaan	Faalo	Goorta la adeegsado
TLP: CLEAR (Cadaan)	Midabka CAD wuxuu tilmaamayaa in xogta la wadaagi karo si guud, iyada oo aan la xaddidin.	Wacyigelin iyo talo-bixinno dadweyne.
TLP: GREEN (Cagaar)	Midabka **Cagaarka** wuxuu tilmaamayaa in xogta lala wadaagi karo dhinacyada ay khusayso, balse aan lala wadaagi karin dadweynaha.	Digniino khuseeya dhinacyo gaar ah iyo xog lala wadaagayo hay'ado wajahaya khataro amni.
TLP: AMBER (Jaale)	Midabka **jaallaha** wuxuu tilmaamayaa in xog xadidan lala wadaago hay'adda iyo dhinacyada ay si toos ah u khusayso.	Warbixin nuglannasho, dhacdo, talooyin farsamo lagu yareyno weerar.
TLP: AMBER + STRICT (Jaale Xadidan)	Midabka **jaalla la xaddiday** wuxuu tilmaamayaa in xogta lala wadaagi karo hay'add gaar ah.	Warbixin iyo caddeyn baaritaan iyo xog xasaasi ah.
TLP: RED (Casaan)	Midabka **casaanka** wuxuu tilmaamayaa in xogta ay ku kooban tahay dadka si loogu magacaabay ama mas'uulka ah, lamana faafin karo.	Weerar khatar ku ah amniga qaranka ama kaabayaasha muhiimka ah.

Hannaanka TLP wuxuu xoojiyaa kalsoonida iyo hufnaanta xogta la is-dhaafsado, si xogta xasaasiga ah ay u gaarto oo keliya dhinacyada ay khuseyso, loogana hortago helitaan, gudbin ama faafin aan la oggolayn.

13. Maareynta Dhacdooyinka Amniga Saaybarka Iyo Doorka Xarunta SOMCIRT

a) **Hannaanka Maareynta Dhacdooyinka**

Hannaanka Maaraynta Dhacdooyinka wuxuu qeexayaa sida hay'adaha dawladda, hay'adaha gaarka loo leeyahay, hawlwadeennada Kaabayaasha Muhiimka ah, iyo daneeyayaasha kale ay si wadajirah uga jawaabaan dhacdooyinka saaybarka. Hannaanku maareynta dhacdooyinka wuxuu ka kooban yahay saddex heer oo kala ah: heer istiraatijiyadeed, heer fulineed, iyo heer farsamo. Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ayaa hoggaamisa isku-duwidda guud ee ka jawaabidda dhacdooyinka amniga saaybarka ee heer qaran, halka SOMCIRT ay tahay xarunta qaran ee ka jawaabidda xaaladaha degdegga ah, la socodka dhacdooyinka, soo saarista digniinnada, bixinta talooyinka farsamo, iyo taageeridda nidaamyada amniga saaybarka.

i. **Heerka Istiraatijiyadeed:**

Guddiga Amniga Saaybarka Qaranka wuxuu bixiyaa jihaynta iyo ansixinta siyaasadda amniga saaybarka, mudnaanta qaran, iyo go'aannada muhiimka ah ee la xiriira dhacdooyinka saameynta ballaaran leh gaar ahaan Amniga dalka.

ii. **Heerka Fulin:** Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka waxay mas'uul ka tahay hawlgelinta Xarunta SOMCIRT, si ay u shaqeyso 24/7/365, iyadoo isku duwaysa CERT-yada gaarka ah, hay'adaha soo gudbiya dhacdooyinka, iyo daneeyayaasha kale ee ku lugta leh ka-jawaabidda dhacdooyinka amniga saaybarka.

iii. **Heerka Farsamo:** Kooxaha ka-jawaabidda dhacdooyinka ee hay'adaha, CERT-yada gaarka ah, iyo hawl-wadeennada Kaabayaasha Muhiimka ah waxay fuliyaan falanqaynta, xakamaynta, ciribtirka, soo-kabashada, iyo qiimeynta kadib dhacdooyinka amniga saaybarka.

b) **Kala-saarista Halista iyo Mudnaanta Warbixinta**

Sida ku cad Sharciga Amniga Saaybarka, hawlwadeennada Kaabayaasha Muhiimka ah waa inay xarunta SOMCIRT ku wargeliyaan dhacdooyinka amniga saaybarka 24 saac gudahood. Dhacdooyinka saameyntoodu sareyso ama halista badan waa in si degdeg ah loogu soo gudbiyo xarunta SOMCIRT. Hay'aduhu waa inay awood u leeyihiin ogaanshaha, falanqaynta, xakamaynta, soo-kabashada, iyo qiimeynta kadib-dhacdada si looga hortago soo noqoshada khataraha.

No	Nooca Khatarka	Faalo
1.	Khatar Fudud	Waa saamayn yar aan lahayn hali muuqata
2.	Khatar Hoose	Waa saamayn kooban oo si fudud loo maareyn karo
3.	Khatar Dhexe	Waa saameyn nidaam ama adeegyo badan.
4.	Khatar Sare	Waa carqalad weyn ama jabin macluumaad xasaasi ah.
5.	Khatar Daran/ Halis	Waa Carqalad amni halis ah oo saameyneysa amniga qaranka.

14. Qorshaha Hirgelinta Hanaanka

Qorshaha Hirgelintu wuxuu qeexayaa qorshe qaran oo muddeysan, kaas oo taageeraya hawl-wadeennada Kaabayaasha Muhiimka ah si waajibaadkooda sharci iyo kuwa u hoggaansanaanta loogu beddelo tallaabooyin wax-ku-ool ah, lana xaqiijin karo. Hannaanku wuxuu saldhig u yahay dhisidda awoodaha amniga aasaasiga ah, maareynta khataraha, iyo xaqiijinta u-hoggaansanaanta iyo sii joogteynta adeegyada iyo horumar amni waara.

14.1. Marxaladda Koowaad (Muddo-Gaaban: 0 - 12 Bilood)

Sanadka koowaad, hawl-wadeennada Kaabayaasha Muhiimka ah waa inay hirgeliyaan qaab-dhismeed amni oo aasaasi ah, iyagoo diiwaangelinaya agabka muhiimka ah, magacaabaya mas'uuliyiinta amniga, qiimeynaya khataraha, hirgelinaya tallaabooyinka amniga ee aasaasiga ah, isla markaana dejinaya hab rasmi ah oo lagu soo gudbiyo dhacdooyinka iyo khataraha amniga saaybarka.

14.2. Marxaladda Labaad (Muddo-dhexaad: 12-24 Bilood)

Muddada Sanadka ilaa Labada (2) Sano, hirgelintu waxay ka gudbi doontaa heerka aasaasiga ah una gudbi doontaa hannaan joogto ah oo qayb ka noqda hawl-maalmeedka hay'adaha. Marxaladdan waxaa diiradda la saari doonaa daaweynta khataraha, qorsheynta miisaaniyadda amniga, kobcinta xirfadaha shaqaalaha, tijaabooyinka adkeysiga, iyo kormeerka joogtada ah. Waxaa lagama maarmaan ah in la qabto tababarro ku aaddan ka hortagga weerarrada saaybarka, iyadoo SOMCIRT ay hormuud ka noqon doonto isku-duwidda, bixinta digniinaha, la-talinta farsamo, iyo jawaab-celinta xaaladaha degdegga ah.

14.3. Marxaladda Saddexaad (Muddo-dheeraad: 24 - 36 Bilood iyo ka badan)

Muddadan, hannaanku wuxuu diiradda saarayaa u hoggaansanaan buuxda, kormeer **ku**-saleysan baaritaan iyo cadeymo iyo horumar joogto ah. Waxaa la xoojin doonaa qiimeynta rasmiga ah, hubinta u hoggaansanaanta, kormeerka madax-bannaan, dib-u-eegista siyaasadaha iyo tallaabooyinka amni,

si u hoggaansanaantu u noqoto mid la qiyaasi karo oo la xaqiijin karo.

14.4. Maamulka Hirgelinta Hannaanka

Xarunta SOMCIRT waxay aasaasi doontaa madal xiriir iywada-tashi oo ay ku mideysan yihiin mas'uuliyiinta amniga ee qaybaha kala duwan iyo wakiillada hawl-wadeennada Kaabayaasha Muhiimka ah. Madashani waxay fududeyn doontaa is-weydaarsiga xogta, isku-duwidda dadaallada amniga saaybarka, xalinta caqabadaha hortaagan hirgelinta, iyo fulinta shuruudaha asaasiga ah.

14.5. Taageerada Hirgelinta Hannaanka

Si loo xaqiijiyo hirgelin dhameystiran oo waxtar leh, waxaa la aasaasi doonaa madal lagu wadaago xogta amniga saaybarka, iyadoo la xoojinayo tababarrada iyo wacyigelinta amniga saaybarka. Sidoo kale, waxaa la diyaarin doonaa tilmaamo farsamo oo hagaya adeegsiga teknoolojiyadaha casriga ah, iyo hannaan qaran oo nidaaminaya shahaado-bixinta khubarada, si loo xaqiijiyo tayada, iyo kalsoonida qalabka iyo amniga u ah kaabayaasha muhiimka ah ee dalka.

15. Gunaanad

Hannaanka Qaranka ee U Hoggaansanaanta Amniga Saaybarka waa tiir muhiim u ah ilaalinta amniga dhijitaalka ah ee Soomaaliya. Wuxuu hay'adaha dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay siinayaa hannaan mideysan oo lagu ilaaliyo Kaabayaasha Muhiimka ah, laguna yareeyo khataraha iyo weerarrada saaybarka. Hanaanku wuxuu shuruudaha aasaasiga ah ee amniga saaybarka u beddelayaa waajibaad rasmi ah, la fulin karo, lana qiimeyn karo. Hirgelintiisu waxay ku xiran tahay wada-shaqeyn dhow oo dhex marta hay'adaha dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay, hoggaan sare oo adag, iskaashi qaran, tababar joogto ah, horumarinta tiknoolajiyadda, iyo u hoggaansanaan dhameystiran. Ugu dambeyn, hanaankani wuxuu Soomaaliya ka taageeri doonaa dhismaha jawi dhijitaal ah oo ammaan ah, adkeysi leh, laguna kalsoonaan karo, isla markaana xoojinaya amniga dalka.

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka
الـهيئـة الوطـنيـة للإتـصـالات
National Communications Authority

This document is produced by
National Communication Authority (NCA).

HANAANKA QARAN EE U HOGGAANSANAANTA AMNIGA SAAYBARKA

https://nca.gov.so

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka
الـهيئـة الوطنيـة للإتـصالات
National Communications Authority

HANAANKA QARAN EE U
HOGGAANSANAANTA AMNIGA
SAAYBARKA

https://nca.gov.so